

WARBIXINTA QIIMEYNTA DEYRTA 2024


Taariikh: 07 Jan, 2025

HORDHAC

Xilli-roobaadkii **Deyrta 2024** ayaa bilaabmay dhammaadkii bishii Sebtembar wuxuuna da'ayay illaa dhammaadka bisha Nofeembar. Inta badan xarumaha roob beegayaasha ee Puntland ayaa diiwaangeliyey roobab ka yar xaddigii di'i jiray, marka laga reebo Xuddun, Murcanyo, Laascaanood, Widh-widh, Burtinle, iyo Xasbahale, kuwaasoo helay in ka badan 100mm oo roob ah.


Iyadoo la tixraacayo guud ahaan roobabkii da'ay muddadii u dhaxaysay Sebtembar ilaa Diseembar (SOND), Xuddun waxaa ka da'ay 177.6 mm, Murcanyo 136.9 mm, Laascaanood 134 mm, Widh-widh 121.8 mm, Burtinle 112 mm, iyo Xasbahale 109 mm, halka degmooyinka kale ay heleen roob xaddi ahaan yar.

Dhanka kale, xarumaha roob beegayaasha Jariiban, Boosaaso, iyo Laasqoray ayaa wax roob ah ka di'in xilli roobaadkii deyrta, sida ku cad (**jaantuska 1^{aad}**) oo ah roobabka ka da'ay deegaanada Puntland.



Khariiradda 1^{aad}: Roobabkii Da'ay Xilli Roobaadka Deyrta 2024


ROOBABKII DA'AY DEYRTA 2024



Jaantuska 1^{aad}: Roobabkii da'ay deyrta 2024

Jaantuska 1: Wuxuu muujinayaa roobabkii Deyrta 2024 ee ka da'ay guud ahaan Puntland, iyadoo jaantusku si cad u tilmaamayo in inta badan xarumaha roob-beegayaasha ay diiwaangeliyeen roobab xaddi ahaan ka hooseeya xaddigii di'i jiray. Dhanka kale Saddex xarumood (Boosaaso, Jariiban, iyo Laasqoray) ayaan diiwaan gelin wax roob ah.


FARQIGA ROOBABKII DA'AY DEYRTA 2024 IYO CELCELIS MUDDADA DHEER



Jaantus 2^{aad}: Farqiga roobabkii da'ay deyrtu 2024 iyo celcelis muddada dheer

Jaantuska 2^{aad}: Wuxuu muujinayaa halbeegga roob yaraanta xilli roobaadkii Deyr iyadoo inta badan xarumaha roob-beegayaasha ay diiwaangeliyeen roobab ka yar xaddigii di'i jiray marka la barbardhigo xaddigii di'i jiray 15-kii sano ee la soo dhaafay. Tirada togan (positive value) waxay muujinaysaa in roob-beegayasahu ay heleen roobab ka badan celceliska muddada dheer (LTA), halka tirada taban (negative value) ay muujinayso in ay heshay roobab ka yar celceliska muddada dheer (LTA).

XAALADDA DAAQA IYO DAHAARKA EE SABO-NOLOLEEDYADA PUNTLAND



Khariidada 2^{aad}: xaaladda daaqa iyo dahaarka ee sabo-nololeedyada puntland

Sida ka muuqata (**khariidada 1^{aad}**) xaaladda daaqa ee deegaanada Puntland ee dayax-gacmeedku qaaday bartamihii Bisha Nofeembar taariikhdeedu ahayd 15–26 2024, waxaa ay muujinaysaa in guud ahaan xaaladda daaqa iyo baadka ee dhamaan Sabo-nololeedyada Puntland uu yaraaday. Tani waxaa sababay roobabkii Deyrta oo ka hooseeyay xaddigii di'i jiray (Below Normal).


Sabo-nololeedka dhul-daaqsimeedka waqooyi (Northern Inland Pastoral Zone (NIP), oo ah kan ugu weyn ee Puntland, waxaa daaqa iyo baadkuba sameeyeen fufid fiican gaar ahaan, degmooyinka Ceerigaabo, Xudun, Laascaanood, iyo Boocame.

Sidoo kale, waxaa daaqa iyo dahaarka dhulku soo kabasho sameeyey Bariga Buuraha Gollis, gaar ahaan Buuralayda Cal-Miskaat, ee degmooyinka Ufeyn, Qandala, Bali-dhidin, iyo Caluula. Iyo qaybo kamid ah Sabo-nololeedka Hawd ka, ee degmooyinka Burtinle iyo Galdogob.

Guud ahaan deegaanada Cadduun iyo Deexda, ee degmooyinka Jariiban, Godobjiran, Bayla, Eyl, Xaafuun, iyo Gumbax, ayaa daaqa yaraaday sababo la xiriira roobabkii Deyrta oo ku yaraa.

XAALADDA TUSAHA ABAARTA

Roobabkii Deyrta ka da'ay deegaanada Puntland oo ahaa kuwo ka hooseeya xaddigii di'i jiray ayaa saameyn taban ku yeeshay hab-nololeedka bulshada. Sida biyo yaraan, hoos u dhac ku yimid helitaanka daaqa/baadka, hayaanka xooladhaqata, hoos u dhac ku yimaada wax soo saarka xoolaha, iyo khilaafaad u dhexeeya reer guuraaga oo ku saleysan kheyraadka dabiiciga ah sida biyaha iyo baadka. Dhanka kale roob yarida ayaa saamaysay wax soo-saarka beeralayda, taasoo halis gelinkarta sugnaanta cuntada .



Khariirad 3^{aad}: Xaaladda Tusaha Abaarta

Xaaladda abaaraha ee bisha Diseembar 2024 waxay muujinaysaa xaalado caadi ah, iyo kuwa meel dhexaad ah. Falanqayntan waxay ka timid tilmaanta isku geynta tusaha roobabka iyo heer-kulka, kuwaasoo soo saaray Tusaha isku-dhafan ee Abaarta.

Sidoo kale, xilliga jiilaalka ah ee soo socda ayaa sii xumeyn kara xaaladda abaaraha. Taas oo saameyn weyn ku yeelan karta habka dhaqan dhaqaale ee bulsho weynta Puntland.

TALO SOOJEEDIN

- Dhammaan wasaaradha arimaha bulshada ka shaqeeya waxaa lagula talinayaa inay labo jibaaraan adeegyada loo hayo bulsha, gaar ahaan qaybta nugul sida in loosameeyo biyo dhaamis, calafka xoolaha, daawaynta xoolaha, iyo qeybinta dalagyada u adkaysan kara abaaraha.
- Hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ahba waxaa lagu boorinayaa inay dar-dar galiyaan adeegyada bili'aadantimino laguna saleeyo baahiyaha dhabta ah ee jira.

Xarunta maareynta xogaha khayraadka Biyaha iyo Dhulka ee Dawladda Puntland waxa ay si joogta ah ula soconaysaa una soo gudbinaysa markasta xaaladda xilliga jiilaalka.



@impuntland



www.impuntland.so



info@impuntland.so



Ministries road, Near to WFP
Garowe, Puntland Somalia

